



STATE OF MINNESOTA
Office of Minnesota Secretary of State
Steve Simon

Agabka Ka-qaybgalka Cod-bixiyeyaasha ee 2025

Sii wad dhaqanka sharaf leh ee Minnesota ee ka-qaybgalka cod-bixinta oo sarreeya.

Ku dar fariimo sahlan oo la adeegsankaro iyo xiriiriyeyaal isgaarsiinta shaqaalahaaga iyo qoraallada aad ku dhejiso baraha bulshada.

Booqo mnvotes.gov si aad u hesho dhammaan macluumaadka la xiriira cod-bixinta.

Wixii faahfaahin ah ama su'aalo ah, kala xiriir [Melanie Hazelip](mailto:Melanie.Hazelip@state.mn.us), 612-327-1621.

Dadka Reer Minnesota ee Qaaliga ah,

Mas'uuliyadda muwaadinimo iyo ka-qaybgalka cod-bixinta ma aha kuwa joogsada sannadada aan doorashooyinka guud la qaban. Sannadka 2025, reer Minnesota guud ahaan gobolka oo dhan waxay udareeri doonaan goobaha cod-bixinta si ay uga qaybqaataan doorashooyinka degmada iyo kuwa deegaanka— kaas oo saameynaya go'aano si toos ah u saameeya nolol maalmeedkiinna. Maadaama ka-qaybgalka doorashooyinkan uu hooseeyo, cod kasta wuxuu leeyahay miisaan dheeraad ah.

Si aan idiinku fududeyno inaad wacyigelinta gaarsiisaan bulshada aad ku dhex nooshihiin, xafiiskeena wuxuu diyaariyey qorshe baaxad leh oo dhexdhexaad ah oo loogu talagalay wacyigelinta cod-bixiyeyaasha, waxaana kamid ah agabkan. Si xor ah u habee farriimahan oo u sii faafi si ballaaran. Minnesota mar kasta waxay hormuud ka tahay heerka ka-qaybgalka cod-bixinta ee qaranka, taas oo ka dhigaysa gobolkeenna midka ugu wanaagsan ee lagu noolaado.

Si xushmad leh,

Steve Simon, Xoghayaha Dowladda ee Minnesota

Dulmar Guud ee Mawduuca

Qaybta 1: Farriimaha Mudnaanta Leh ee la Talo-bixiyay

Doorashooyinka Gaar ah, bogga 2

Maalinta Diiwaangelinta Cod-bixiyeyaasha Qaranka, Sebteembar 17, bogga 4

Cod-bixinta Hore, Sebteembar 20, bogga 5

Samee Qorshe Aad Ku Codeyso, Oktoobar 29, bogga 6

Doorashada, Noofembar 4,

Qaybta 2: Qalab iyo Fikrado Dheeraad ah oo Wacyigelin ah, bogga 7

Qaybta 3: Dhiirrigelinno Dheeraad ah oo Isgaarsiineed, bogga 8

Qaybta 4: Baraha Bulshada iyo Sawirrada Garaafyada, bogga 8

Doorashooyinka Gaar ah

Waxaa doorashooyin gaar ah laga qabanayaa guud ahaan gobolka xilligan guga. Haddii aad ku nooshahay ama ka shaqeyso mid ka mid ah degmooyinkan hoose ku xusan, fadlan la wadaag fariimaha la soo jeediyay si bulshadu u hesho macluumaadka ay u baahan yihiin si ay uga qaybqaataan.

Maarso 11, 2025

- [Waa Doorasho Gaar Ah Degmada Sharci-dejinta 40B40B](#) (Boos Banaan)

Abriil 8, 2025

- Doorasho Gaar ah – Guddiga Gobolka Itasca, Degmada 4 (Boos Banaan)
- Doorasho Gaar ah – Magaalada Aldrich (Boos Banaan)
- Doorasho Gaar ah – Magaalada Baldwin (Su’aal)
- Doorasho Gaar ah – Magaalada Benson (Boos Banaan)
- Hordoorasho Gaar ah – Magaalada Isanti (Boos Banaan)
- Doorasho Gaar ah – Magaalada Rose Creek (Boos Banaan)
- Doorasho Gaar ah – Magaalada Two Harbors (Boos Banaan)
- Doorasho Gaar ah – Degmada Stately Township (Su’aal)
- Doorasho Gaar ah – Degmada Dugsiga ISD 186 - Pequot Lakes (Su’aal)
- Doorasho Gaar ah – Degmada Dugsiga ISD 213 - Osakis (Su’aal)
- Doorasho Gaar ah – Degmada Dugsiga ISD 238 - Mabel-Canton (Su’aal)
- Doorasho Gaar ah – Degmada Dugsiga ISD 308 - Nevis (Su’aal)
- Doorasho Gaar ah – Degmada Dugsiga ISD 742 - Aagga St. Cloud (Su’aal)
- Doorasho Gaar ah – Degmada Dugsiga ISD 2174 - Pine River-Backus (Su’aal)
- Doorasho Gaar ah – Degmada Dugsiga ISD 2769 - Aagga Morris (Boos Banaan)
- Doorasho Gaar ah – Degmada Dugsiga ISD 2909 - Rock Ridge (Boos Banaan))

May 13, 2025

- Doorasho Gaar ah – Guddiga Gobolka Traverse, Degmada 3 (Boos Banaan)
- Doorasho Gaar ah – Magaalada Orono (Boos Banaan)
- Doorasho Gaar ah – Degmada aan la abaabulin (Unorg. Township) 63-17 (Su’aal)
- Doorasho Gaar ah – Degmada Dugsiga ISD 177 - Windom (Su’aal)
- Doorasho Gaar ah – Degmada Dugsiga ISD 2137 - Kingsland (Su’aal)
- Doorasho Gaar ah – Degmada Dugsiga ISD 2144 - Chisago Lakes (Su’aal)
- Doorasho Gaar ah – Degmada Dugsiga ISD 2754 - Cedar Mountain (Su’aal)

Ogosto 12, 2025

- Doorasho Gaar ah – Magaalada Isanti (Boos Banaan)

Taariikhaha Doorashooyinka Gaar ah

Doorashooyinka gaar ah badiyaa waxaa la qaban karaa oo kaliya mid ka mid ah shanta taariikhood ee hoos ku xusan:

- Talaadada labaad ee Febraayo
- Talaadada labaad ee Abriil
- Talaadada labaad ee May
- Talaadada labaad ee Ogosto
- Talaadada koowaad ee bisha Noofembar kadib Isniinta ugu horreysa

Farriimaha Mudnaanta Leh ee La Talo-bixiyay

Khadka Mawduuca : *Digniin Doorasho Gaar ah!*

Fariinta Loogu Talagalay Wargeyska Email-ka ama Warsidaha:

Ku: [Magaca qofka la dirayo],

In kasta oo ay tahay 2025, taasi micnaheedu ma aha inaysan jirin doorasho sanadkan! Ma ogtahay in **Doorasho Gaar ah** ay ka dhici doonto aaggaaga [ku dar taariikhda doorashada]?

Doorashooyinka gaarka ah waxaa loo qabtaa in lagu buuxiyo xafiisyada bannaan ama lagu go'aamiyo su'aalaha muhiimka ah ee cod-bixinta. Waxa ay dhici karaan waqtiyo kala duwan sanadka gudihiisa ama la socdaan doorashooyinka caadiga ah. Doorashooyinkan si toos ah ayey u saameeyaan bulshadeenna iyo arrimaha deegaanka ee maalinkasta noloshaada khuseeya.

Hubi inaad diyaar u tahay inaad cod-bixiso! Booqo mnvotes.gov si aad u xaqiijiso xaaladda diiwaangelintaada cod-bixineed, sidoo kalena la xiriir [maamulka deegaankaagan](https://mnvotes.gov) wixii faahfaahin ah ee ku saabsan xafiiska bannaan ama su'aasha cod-bixinta.

Noqo cod-bixe—kala qeyb qaado codkaaga!

Qoraalka La Talo-bixiyay ee Baraha Bulshada::

🔔 *Digniin Doorasho Gaar ah!* Waxaa doorasho gaar ah oo maxalli ah ka dhici doonta deegaankaaga dhowaan. Booqo mnvotes.gov, wac **877-600-VOTE**, ama u dir qoraal lambarka **651-217-3862** si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah. 🔔

Garaafyada Baraha Bulshada:



Maalinta Qaranka ee Diiwaangelinta Cod-bixiyeyaasha

Ka faa'iidayso Maalinta Qaranka ee Diiwaangelinta Cod-bixiyeyaasha (Sebteembar 16, 2025) si aad uga qeybgeliso bulshadaada—dariskaaga, shaqaalahaaga, asxaabtaada, iyo kuwa kale—hannaanka cod-bixinta. **Qorshee oo u qeybso fariimahaada isgaarsiineed ilaa Sebteembar 15** si aad u gaarto saameyn ballaaran oo aad u dhiirrigeliso ka-qaybgalka.

Fariinta Email-ka:

Khadka Mawduuca: Isku Diyaari Maalinta Qaranka ee Diiwaangelinta Cod-bixiyeyaasha!

Ku: [ku dar magaca la dirayo],

Sebteembar 16 waa Maalinta Qaranka ee Diiwaangelinta Cod-bixiyeyaasha—isku diyaari inaad cod-bixiso! Tallaabada ugu horreysa waa inaad xaqiijiso diiwaangelintaada cod-bixineed. Haddii aadan waligaa horey uga codeyn Minnesota, aad dhawaan u guurtay, bedeshay magacaaga, ama aadan cod-bixin afartii sano ee la soo dhaafay, hadda waa waqtigii aad is-diiwaangelin lahayd [register](#).

Laakiin taa kaliya kuma eka. Ma ogtahay inaad si toos ah hore ugu codeyn karto [vote early in person](#) Haddii aad qorsheyneyso inaad joogin maalinta doorashada (Noofembar 4) ama aad doorbideyso [vote by mail inaad codkaaga ku dirto boostol](#), maanta dalbo warqadda cod-bixinta maqnaanshaha (absentee ballot). Hab kasta oo aad u cod-bixiso, waa muhiim in codkaagu la maqlo. La xiriiir maamulka deegaankaaga [local jurisdiction](#) si aad u codsato cod-bixin maqnaansho ah.

Ha ilaawin—dhallinyarada da'doodu tahay 16 iyo 17 jir waxay horay isu diiwaangelin karaan [pre-register](#) i ay diyaar ugu noqdaan marka waqtigu yimaado!

Aan ka dhigno codkeenna mid la tixgeliyo!

Qoraalka Baraha Bulshada ee La Talo-bixiyay:

🔔 Waa Maalinta Qaranka ee Diiwaangelinta Cod-bixiyeyaasha! 🔔 [Register to vote](#) Is-diiwaangeli maanta si aad ugu diyaar garowdo doorashada soo socota!

✓ Isku diyaari inaad ka codeyso doorashooyinka maxalliga ah ee soo socda. Booqo si aad u hubiso haddii aad is-diiwaangelisay. Haddii aadan is-diiwaangelin, dhawaan u guurtay, ama bedeshay magacaaga—iska diiwaangeli MAANTA! 🗳️

📌 *Ha iloobin*—dhallinyarada da'doodu tahay **16 iyo 17 jir** waxay hore isu **diiwaangelin karaan** si ay diyaar ugu noqdaan inay codeeyaan marka waqtigu yimaado [pre-register](#)!

#NationalVoterRegistrationDay #MNVotes #CodkaaguWaaCodkaaga

Qoraalka Warsidaha ee La Talo-bixiyay

Maalinta Qaranka ee Diiwaangelinta Cod-bixiyeyaasha

Talaadada, Sebteembar 16 waa **Maalinta Qaranka ee Diiwaangelinta Cod-bixiyeyaasha**. Ma diyaar baad u tahay inaad ka qaybqaadato doorashooyinka maxalliga ah ee soo socda?

Tallaabada Koowaad: Hubi diiwaangelintaada [Check your registration](#). . Haddii

aadan hore uga codeyn Minnesota, aad dhawaan u soo guurtay, bedeshay magacaaga, ama aadan cod-bixin wax ka badan afar sano, waa inaad is-diiwaangelisaa si aad u codeyso [register to vote](#).

Tallaabada Labaad: Haddii loo baahdo, is-diiwaangeli [Register](#). Waxay qaadanaasaa dhowr daqiiqo kaliya waxaana lagu samayn karaa taleefoon, kombiyuutar ama warqad. In kasta oo aad iska diiwaangelin karto maalinta doorashada lafteeda, ka fogow safafka oo waqti badbaadi adigoo hadda is-diiwaangelinaya.

Tallaabada Saddexaad: Ka fiirso warqadda cod-bixintaada oo bilaaw ka fikiridda codadka aad dhiiban doonto. [Check out your ballot](#).

Waxaa doorashooyin maxalli ah ka dhici doona guud ahaan Minnesota sanadkan. Doorashooyinka maxalliga ah aad bay muhiim u yihiin, sababtoo ah waa kuwa lagu go'aamiyo adeegyada aasaasiga ah sida amniga bulshada, wabarashada, gaadiidka, iyo nadaafadda. Ha moogaan fursaddaada aad uga qaybqaadan karto!

Doorashooyinka maxalliga ah waxay inta badan leeyihiin ka-qaybgal hoose marka la barbar dhigo kuwa heer gobol ama qaran. Tani waxay ka dhigan tahay in codkaagu yeesho miisaan ka badan, isla markaana uu si weyn u saameyn karo natiijada doorashada. Codkaagu waa muhiim.

La xiriir maamulka deegaankaaga [local jurisdiction](#) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. Haddii aad qabto su'aalo kale oo la xiriira cod-bixinta, booqo [mnvotes.gov](#).

Qalab Taageero Dheeraad ah

[Let's Get Ready to Vote](#) Waxaa sidoo kale lagu heli karaa afafka [Hmong](#), [Somali](#) iyo [Spanish](#). [How to Vote](#) Xaashida Xaqiiqooyinka "Sida Loo Codeeyo" – Xooji fariimaha email-ka adigoo dhigaya warqaddan qolka nasashada ee shaqaalaha. Waxaad iskaa u daabacan kartaa ama dalban kartaa tiro badan oo bilaash ah. Waxaa laga heli karaa 11 luqadood; [available in 11 languages](#).

Doorashada Hordhaca ah

Doorashooyinka hordhaca ah waa qayb aasaasi u ah habka dimuqraadiyadda. Waxay go'aamiyaan cidda musharaxiinta noqon doonta ee lagu arki doono warqadda cod-bixinta bisha Noofembar, waxayna ku siinayaan fursad aad ku xulan karto qofka ugu dhawaaqa aragtidaada iyo qiyamkaaga. Ka caawi xubnaha bulshadaada inay ka qaybqaataan **adigoo fariimaha hoose diraya ugu dambayn Ogosto 12.**

Fariinta Email-ka ee La Talo-bixiyay:

Khadka Mawduuca: *Codkaaga Ka Dhiibo Doorashooyinka Hordhaca ah ee Minnesota 2025!*

Ku: [Magaca Koowaad],

Minnesota waxay leedahay taariikh sharaf leh oo ku saabsan ka-qaybgalka muwaadiniinta, waxaana 2025 codkaagu leeyahay muhiimad gaar ah. Doorashooyinka hordhaca ah ee dhici doona Talaadada, Ogosto 12, 2025, ayaa go'aamin doona musharaxiinta lagu arki doono warqadda cod-bixinta Noofembar—ka-qaybgalkaaguna wuxuu xaqiijinayaa in hoggaamiyeyaasha nagu matalaya ay muujiyaan qiyamka iyo mudnaanta aynu leenahay.

Waa maxay sababta ay muhiim u tahay inaad ka qaybqaadato doorashooyinka hordhaca ah?

- ✅ *Waxaad Saamayn Ku Yeelanaysaa Doorashada Guud:* Codkaagu wuxuu go'aaminayaa musharaxiinta u gudbaya wareegga dambe..
- ✅ *Taageer Arrimaha Kugu Muhiimka ah:* Laga bilaabo waxbarashada ilaa daryeelka caafimaadka, doorashadani waxay saameyn doontaa siyaasado muhiim ah.
- ✅ *Adkee Dimuqraadiyaddeenna:* Ka-qaybgalka sare ee cod-bixiyeyaasha wuxuu keenayaa dowlad ka turjumaysa dadkeeda.

Ways to Vote:

-  Cod-bixinta Tooska ah – Goobaha cod-bixintu waxay furnaan doonaan laga bilaabo 7:00 subaxnimo ilaa 8:00 fiidnimo maalinta doorashada.Day.
-  Cod-bixinta Hore – Minnesota waxay bixisaa fursado cod-bixin hore. La xiriir xafiiska doorashada deegaankaaga si aad u ogaato faahfaahinta.
-  Cod-bixinta Maqnaanshaha (Absentee Voting) – Ma imaan kartid goobta cod-bixinta? Dalbo warqad cod-bixin maqnaansho.
-  **Is-diiwaangelinta Isla Maalinta Doorashada** – Ma is-diiwaangelin weli? Minnesota waxay kuu oggolaanaysaa inaad is-diiwaangeliso oo cod-bixiso isla maalinta doorashada haddii aad hayso caddayn deganaansho.

Ha seegin fursaddan aad isbedel ugu horseedi karto bulshadaa. Calaamadee jadwalkaaga: Ogosto 12, 2025, una samee qorshe aad ku codeyso!!

For Wixii faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan goobaha cod-bixinta iyo hannaanka doorashada, booqo mnvotes.gov, wac 877-600-VOTE, ama qoraal u dir 651-217-3862.

Codkaagu waa muhiim. Aan adkeyno dimuqraadiyadda Minnesota!!

Qoraalka Warsidaha ee La Talo-bixiyay:

Maalinta Doorashada Hordhaca ah ee Minnesota

Ku: [magaca qofka la dirayo],

Marka aan u soo dhowaanayno doorashooyinka hordhaca ah ee 2025, waa muhiim in aan aqoonsanno awoodda uu qof walba u leeyahay qaabeynta mustaqbalka bulshadeenna iyo gobolka. Minnesota waxay leedahay dhaqan sharaf leh oo ku saabsan ka-qaybgalka muwaadiniinta, iyadoo mar walba hormuud u ah heerka cod-bixinta qaranka. Sannadkan, aan sii wadno dhaxalkaas anagoo ka qaybqaadanayna doorashooyinka hordhaca ah ee soo socda..

Waa maxay sababta aad uga qaybqaadanayso doorashooyinka hordhaca ah?

1. Xulo Wakiilladaada: Doorashooyinka hordhaca ah waxay go'aamiyaan musharraxiinta lagu arkayo warqadda cod-bixinta ee doorashada guud ee Noofembar. Adigoo codkaaga dhiibanaya, waxaad si toos ah ugu dooran kartaa cidda ugu dhowaaqa qiyamkaaga iyo waxyaabaha mudnaanta kuu leh.
2. La Tacaal Arrimaha Muhiimka ah: Doorashooyinka 2025 waxay saamayn doonaan arrimo waaweyn oo gobolka saameeya, sida siyaasadaha daryeelka caafimaadka, maalgelinta waxbarashada, iyo horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha. Codkaagu wuxuu dammaanad qaadaa in arrimahan si waafaqsan baahida bulshada loo wajaho.
3. Adkeeynta Dimuqraadiyadeenna: Ka-qaybgalka sare ee doorashooyinka hordhaca ah wuxuu horseedaa dowlad ka turjumaysa oo si wanaagsan ugu adeegta dadkeeda. Ka qaybqaadashada hannaanka doorashada heer kasta waxay xoojinaysaa aasaaska nidaamka dimuqraadiyadeed ee aan wada leenahay.

Macluumaad Muhiim ah:

- Taariikhda Doorashada Hordhaca ah: *Talaado, Ogosto 12, 2025*
- Xulashooyinka Cod-bixinta:
 1. Cod-bixinta Tooska ah: Goobaha cod-bixintu waxay furnaan doonaan laga bilaabo 7:00 subaxnimo ilaa 8:00 fiidnimo maalinta doorashada.
 2. Cod-bixinta Hore: Minnesota waxay bixisaa fursado cod-bixin hore. La xiriir xafiiska doorashada ee deegaankaaga si aad u ogaato taariikhaha iyo goobaha.
 3. Cod-bixinta Maqnaanshaha: Haddii aadan awoodin inaad si toos ah u cod-bixiso, codso warqadda cod-bixinta maqnaanshaha.
 4. Is-diiwaangelinta Isla Maalinta Doorashada: Minnesota waxay oggolaanaysaa is-diiwaangelin isla maalinta doorashada. U tag goobta cod-bixinta adigoo wata caddayn deganaansho si aad isu diiwaangeliso oo u codeyso isla maalintaas.

Ma u baahan tahay macluumaad dheeraad ah? Booqo mnvotes.gov, wac 877-600-VOTE, ama qoraal u dir 651-217-3862..

Ka-qaybgalkaagu waa mid muhiim ah. Markaan isla shaqeyno, waxaan xaqiijin karnaa in Minnesota ay sii ahaato meel kobcaysa oo ka tarjunta codadka kala duwan ee dadka deggen. Calaamadee jadwalkaaga oo samee qorshe aad ku codeyso doorashada hordhaca ah ee 2025.

Qoraalka La Talo-bixiyay ee Baraha Bulshada

 *Reer Minnesota, codkiinnu waa muhiim!* 

Doorashooyinka hordhaca ah ee 2025 waxay dhici doonaan Ogosto 12, waxaana codkaagu go'aaminayaa musharraxiinta u gudbi doona doorashada guud. Fursaddan waa tan aad ku qaabeyn karto mustaqbalka gobolkaaga iyo siyaasadaha ku saabsan arrimaha muhiimka ah—waxbarashada, daryeelka caafimaadka, kaabayaasha dhaqaalaha, iyo in ka badan!!

- ✓ Ka codee toos ahaan Ogosto 12
- ✓ Ka faa'iidayso cod-bixinta hore
- ✓ Haddii loo baahdo, codso warqad cod-bixin maqnaansho
- ✓ Is-diiwaangelinta isla maalinta doorashada waa la heli karaa!

Samee qorshe aad ku codeyso, aan sii adkeyno dimuqraadiyadda Minnesota. Wax badan ka baro mnvotes.gov #MNPrimary #Vote2025 #CodkaaguWaaMuhiim

 **Minnesota!** Doorashada hordhaca ah ee 2025 waa Ogosto 12 – ha seegin fursaddaada cod-bixinta!



- ✓ Doorro cidda u gudbeysa doorashada guud
- ✓ Ka codee hore, boosto ahaan, ama toos ah
- ✓ Is-diiwaangelinta isla maalinta doorashada waa la oggol yahay!

Codkaaga = Codkaaga. Ka dhig mid la maqlo! #MNPrimary #Vote2025 #MinnesotaVotes

 **Minnesota!** Doorashada hordhaca ah ee 2025 waa Ogosto 12 – ha seegin fursaddaada cod-bixinta!



- ✓ Ka codee hore ama maalinta doorashada
- ✓ Isticmaal warqad cod-bixin maqnaansho haddii loo baahdo
- ✓ Ma is-diiwaangelin weli? Dhib malaha! Waxaa la heli karaa is-diiwaangelin isla maalinta cod-bixinta.

Calaamadee saaxiib oo samee qorshe aad ku codeyso!   #MNPrimary #YourVoteYourPower #Vote2025

Doorashooyinka hordhaca ah ee 2025 ee dhici doona Ogosto 12 waxay go'aamin doonaan musharraxiinta u gudbi doona doorashada guud. Adigoo ka qaybqaadanaya hordoorashada, waxaad si toos ah u dooran kartaa cidda metelaya bulshadaada arrimaha muhiimka ah sida waxbarashada, daryeelka caafimaadka, iyo horumarinta dhaqaalaha.

-  Ka codee hore, toos ahaan, ama boosto
-  Is-diiwaangelin isla maalinta doorashada waa la heli karaa!!

Ka-qaybgalka muwaadiniinta wuxuu adkeeyaa dimuqraadiyadda—ka dhig codkaaga mid la maqlo. Wax badan ka ogow mnvotes.gov #MNPrimary #CivicEngagement #Vote2025

Cod-bixinta Hore

Cod-bixinta hore ee tooska ah hadda waa fursad qof walba u furan, waxaana isticmaalay in ka badan 1.2 milyan oo reer Minnesota ah sanadkii 2024.

Aan dhiirrigelinno dad badan inay doortaan cod-bixinta hore doorashooyinka maxalliga ah ee 2025.

U diyaari fariimahan in la qeybiyo ama la faafiyo ku dhowaad Sebteembar 19.

Fariinta Email-ka ee La Talo-bixiyay:

Khadka Mawduuca: *Noqo Cod-bixe Hore*

Maalinta Doorashadu waa muhiim, laakiin ma ogtahay inaad u baahnayn inaad sugeyso maalintaas si codkaagu u noqdo mid la maqlo? Cod-bixinta hore waa hab weyn oo lagu xaqiijiyo in warqaddaada cod-bixintu la gudbiyo adigoo la kulmin walwalka safaf dhaadheer ama xaalado lama filaana oo dhaca maalinta doorashada.

Waa kan sababta cod-bixinta hore ay muhiim u tahay:

✓ **Raaxo iyo Fudayd:** Dooro waqti adiga kugu habboon, kana fogaaw ciriiriga maalinta cod-bixinta.

✓ **Niyad-raaxo:** Dhiib codkaaga horay si aad uga fogaato arrimo kugu yimaada daqiiqaddii ugu dambaysay.

✓ **Fursado kala duwan:** Cod-bixinta hore waxay kuu oggolaanaysaa inaad ku codeyso toos ama boosto ahaan—xulashada waa adiga.

Cod kasta waa muhiim. Marka aad sameysato qorshe cod-bixin hore, waxaad xaqiijineysaa in codkaagu si dhab ah loo maqlo. La xiriir xafiiska doorashada deegaankaaga si aad u ogaato goobaha iyo waqtiyada cod-bixinta hore.

Samee qorshe— codkaaga horey u dhiibo!

Ma ogtahay inaad [xaq u leedahay fasax shaqo](#) si aad u codeyso wakhti kasta oo ka mid ah muddada 46-ka maalmood ee cod-bixinta hore?

Qoraallada Baraha Bulshada ee La Talo-bixiyay:

🗳️ Ma ogtahay in dad qaar ay horey ugu codeeyeen si toos ah? [Adigana waad awoodaa!](#) #mnvotes

🗳️ Xayeysiisyadii doorashadu ma kugu filnaadeen? Noqo cod-bixe hore oo iska illow buuqa! [Waa kan sida loo sameeyo.](#)


🗳️ Ha ku xannibmin safafka maalinta doorashada. Ka codee hore! [Waa kan sida.](#)

🗳️ Ha u ogolaan wax kasta inay kaa hor istaagaan inaad codkaaga dhiibato. Samee maanta, berri, ama wakhti kasta ka hor maalinta doorashada. [Waa kan sida.](#)

🗳️ Haddii aad horey u go'aansatay cidda aad u codeyneyso, noqo cod-bixe hore! Waxaad hadda bilaabi kartaa. [Waa kan sida.](#)

🗳️ Ma ogtahay [inaad xaq u leedahay inaad hesho fasax shaqo](#) si aad u codeyso wakhti kasta muddada 46-ka maalmood ee cod-bixinta hore

Sawirrada/Garaafyada Baraha Bulshada:



Qoraalka Warsidaha ee La Talo-bixiyay:

Cod-bixinta Maqnaanshaha iyo Cod-bixinta Hore ee Tooska ah

Maalinta doorashada way soo dhowdahay, balse maxaad u sugeysaa? Cod-bixinta hore waa fursad u furan dhammaan cod-bixiyayaasha xaq u leh ee ku nool Minnesota. Waxaad si toos ah ugu codeyn kartaa ama codka ku diri kartaa boosto laga bilaabo Sebteembar 19. Waxa kale oo aad hadda ku biiri kartaa liiska joogtada ah ee cod-bixinta maqnaanshaha, si laguugu soo diro warqadda cod-bixinta doorasho kasta. Booqo mnvotes.gov/absentee si aad u ogaato faahfaahin.

Sababaha Ugu Wanaagsan ee Loogu Codeeyo Hore:

- ✓ **Ka Fogoow Safafka** – Looma baahna in laga walwalo sugitaan dheer maalinta doorashada.
- ✓ **Ka Hortag Dhibaatooyinka Lama Filaan ah** – Nolosha wax baa iska dhacaya! Hubi in codkaagu la tiriyo.
- ✓ **Waqti Badan, Fursado Badan** – Gobollo badan waxay bixiyaan fursado cod-bixin hore iyo cod-bixin boosto ahaan.

Cod-bixinta hore waxay xaqiijineysaa in waxba kaa hor istaagi karin inaad cod-bixiso. Ha u ogolaan xanuun ama xaalad lama filaan ah inay kaa hor istaagto codkaaga. Samee sida ay sameeyeen 1.2 milyan reer Minnesota ah sanadkii 2024: **Ka codee hore!** - ama toos ahaan ama boosto. booqo mnvotes.gov si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cod-bixinta hore iyo mowduucyo kale.

Qalab Taageero Dheeraad ah:

[Vote Early, Vote Absentee](#) Fiidiyowga “Ka Codee Hore, Ka Codee Maqnaansho ahaan” – Waxay sharxaysaa sida aad ugu codeyn karto hore adigoo isticmaalaya cod-bixinta maqnaanshaha.
[Vote Early By Absentee](#) Xaashida Xaqiiqooyinka “Ka Codee Hore adigoo Maqan” – Xooji fariinta email-ka adigoo ku dhejinaya macluumaadkan boorarka bulshada, qolalka nasashada shaqaalaha, iwm. Waxaad iskaa u daabacan kartaa ama dalban kartaa tiro badan oo bilaash ah. Waxaa lagu heli karaa 11 luqadood [available in 11 languages](#).

Samee Qorshe Aad Ku Codeyso

Cilmi-baarisyo waxay muujinayaan in qofku marka uu horay uga fakaro goorta, sida, iyo meesha uu codka ka dhiibanayo, ay aad u kordhayso suurtagalnimada inuu si dhab ah u codeeyo. Aan ka caawino bulshadaada ama shaqaalahaaga inay Sameeyaan Qorshe Cod-bixineed. U diyaari fariimahan in la qaybiyo agagaarka **Oktoobar 28**.

Fariinta Email-ka ee La Talo-bixiyay:

Khadka Mawduuca: *Samee Qorshe Aad Ku Codeyso*

Ku: [Kooxda/Bulshada/Asxaabta Shaqada],

Maalinta Doorashadu waa hal todobaad uun! Weli waxaad fursad u leedahay [inaad si toos ah hore ugu codeyso ilaa Noofembar 3](#), taasoo kaa badbaadin karta safafka maalinta doorashada, inaad 20 daqiiqo hore u toosto, ama xaalad degdeg ah oo kaa hor istaagi karta inaad tagto goobta cod-bixinta.

Haddii aad jeceshahay inaad si dhaqameed ah u codeyso, samee qorshe cod-bixineed: Qorshee waqtiga aad codeyn doonto Noofembar 4 oo ku qor jadwalkaaga—hadda!! [Xaqiiji diiwaangelintaada, hel goobtaada cod-bixinta](#) oo ku dar jadwalkaaga, kana fiirso waxa ku jira [warqadda cod-bixinta](#). Ha illoobin inaad dejiso xasuusin habeenka ka horreeya iyo 30 daqiiqo ka hor intaadan tagin goobta cod-bixinta! Booqo mnvotes.gov si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo la xiriira cod-bixinta.

Qoraalka Baraha Bulshada ee La Talo-bixiyay:

Samee qorshahaaga cod-bixinta maanta. Ka ogow goorta, meesha, iyo sida aad u codeyn karto mnvotes.gov. #mnvotes

Sawirrada/Garaafyada Baraha Bulshada:



Qoraalka Warsidaha ee La Talo-bixiyay

Samee Qorshe Aad Ku Noqoto Cod-bixiye

Maalinta Doorashadu waa fursaddaada aad ku muujin karto codkaaga iyo awooddaada—hubi inaad diyaar u tahay! Waa kuwan siyaabaha aad qorshe ugu samayn karto inaad noqoto cod-bixiye:

Ikhtiyaarka 1: Ka Codee Hore Toos Ahaan

Ka fogow ciriiriga maalinta doorashada, iska ilaali caqabadaha lama filaanka ah, oo codkaaga dhiibo adiga oo raaxo ku jiro. Waxaa jira boqollaal goobood oo cod-bixin hore ah—hel mid adiga kugu habboon. Ku dhammee hadda ama qorshee maalin aad hore u codeyso!

Ikhtiyaarka 2: Samee Qorshe Maalinta Doorashada

Life Nolosha way mashquul badan tahay! Dejiso xasuusin si aad u cod-bixiso, ku dar goobtaada cod-bixinta jadwalkaaga, oo si horudhac ah u eeg warqadda cod-bixintaada. Daabaco nuqul, calaamadee

doorashooyinkaaga, kuna qaado marka aad tagayso si ay cod-bixintu kuugu noqoto mid degdeg ah oo fudud.

2025 Waa Sanad Doorasho Maxalli ah!

Doorashooyinka maxalliga ah waxay saameyn ku yeeshaan dugsiyada, amniga bulshada, kaabayaasha dhaqaalaha, iyo waxyaabo kale oo badan. Codkaagu wuxuu door weyn ka ciyaaraa qaabaynta mustaqbalka bulshadaada—ha seegin fursaddan aad ku keeni karto isbeddel dhab ah.

Noqo Cod-bixe!

Samee qorshahaaga cod-bixinta maanta. Ma qabtaa su'aalo? Booqo mnvotes.gov si aad u hesho macluumaad dheeraad ah..

Qalab Taageero Dheeraad ah:

Fiidiyowga “[Waa Sanad Doorasho, Minnesota](#)” – Waxaa sidoo kale lagu heli karaa afafka [Hmong](#), [Somali](#) iyo [Spanish](#).

[Is-diiwaangelinta Maalinta Doorashada](#), [Fasaxa Shaqada si Loo Codeeyo](#) iyo [Xaashiyaha Xaqiiqooyinka ee Ku Saabsan: Gargaar loo fidiyo Cod-bixiyeyaasha](#). Xooji fariinta email-ka adigoo ku dhejinaya macluumaadkan goobaha nasashada ee shaqaalaha. Waxaad iskaa u daabacan kartaa. [Waxaa lagu heli karaa 11 luqadood. available in 11 languages.](#)

Fariinta Email-ka ee La Talo-bixiyay:

Khadka Mawduuca: *Ka Dhig Codkaaga Mid La Maqlo – Codee Maanta!*

Ku: [Kooxda/Bulshada/Asxaabta Shaqada],

Maanta waa Maalinta Doorashada ee Minnesota! Doorashooyinka maxalliga ah waa qayb muhiim ah oo lagu qaabeeyo bulshadeenna, codkaaguna waa muhiim. Markaad dhiibato codkaaga, waxaad go'aaminaysaa arrimo iyo hoggaan si toos ah u saameeya nolol maalmeedka.

Haddii aadan weli codeyn, hubi macluumaadka ka imanaya [maamulka deegaankaaga](#). Waxa kale oo aad la xiriiri kartaa Khadka Caawinta Doorashooyinka. 📞 Wac: 1-877-600-VOTE 📠 Qoraal u dir: 651-217-3862 Goobaha cod-bixintu waxay furnaanayaan laga bilaabo 7:00 subaxnimo ilaa 8:00 fiidnimo, markaa wali waad ka qaybqaadan kartaa!

Haddii aad horey u codeysay, waad ku mahadsan tahay doorkaaga firfircoon ee bulshadeenna. Fadlan ku dhiirrigeli saaxiibbadaa, qoyskaaga, iyo asxaabtaada shaqada inay iyaguna sidaas oo kale yeeshaan!

Cod kasta waa muhiim—aan isbeddel ku abuurno si wadajir ah.

Qoraalka Warsidaha ee La Talo-bixiyay:

 Xasuusin Maalinta Doorashada: Codkaagu Waa Muhiim!

 **Taariikh:** Noofembar 4, 2025

 **Goobo:** Goobaha cod-bixinta ee guud ahaan Minnesota

Ku: [Bulshada/Kooxda/Asxaabta Shaqada],

Maanta waa Maalinta Doorashada ee Minnesota, codkaagana wuxuu door muhiim ah ka ciyaaraa qaabaynta bulshadeenna! Doorashooyinka maxalliga ah waxay saameeyaan go'aamo muhiim ah oo la xiriira

waxbarashada, adeegyada bulshada, iyo hoggaaminta—codkaagu isbeddel buu sameeyaa.

🔍 Ma u baahan tahay macluumaad ku saabsan cod-bixinta?

✓ Hel goobta cod-bixintaada: mnvotes.gov

✓ Saacadaha cod-bixinta: Furman ilaa 8:00 fiidnimo

✓ Maxaa ku jira warqadda cod-bixinta? Baro [musharaxiinta iyo arrimaha](#) kahor intaadan codeyn.

🕒 Weli Ma Codeysay? Waqti Baa Haray!

U gudub goobta cod-bixinta ka hor inta aysan xirmayn oo ka dhig codkaaga mid la maqlo. Haddii aad horey u codeysay—mahadsanid! Fadlan ku dhiirrigeli saaxiibbadaa, qoyskaaga, iyo asxaabtaada shaqada inay iyaguna codkooda dhiibtan.

Ma u Baahan Tahay Caawin? Wac ama qoraal u dir Khadka Caawinta Doorashooyinka: 📞 Wac: 1-877-600-VOTE 🗳️ Qoraal: 651-217-3862

🇲🇳 Faafi Farriinta

Cod kasta waa muhiim! La wadaag farriintan shabakaddaada si aan u dhisno bulsho xog ogaal ah oo firfircoon. Waad ku mahadsan tahay doorka aad ka qaadanayso qaabaynta mustaqbalka Minnesota!

Qoraallo La Talo-bixiyay oo loogu talagalay Baraha Bulshada:

🗳️ Minnesota, maanta waa Maalinta Doorashada! Cod-bixintaada maxalliga ahi waxay saameyneysaa dugsiyada, adeegyada bulshada, iyo hoggaanka. Goobaha cod-bixintu waa furan yihiin ilaa **8:00 fiidnimo** — ka dhig codkaaga mid la maqlo! 🔗 Hel goobta cod-bixinta: mnvotes.gov. #VoteMN #ElectionDay

🗳️ Maanta waa Maalinta Doorashada ee Minnesota! Codkaagu wuxuu qaabeeyaa bulshadaada. Ha seegin fursadda aad ku keeni karto isbeddel—tag goobta cod-bixinta ka hor inta aysan xirmayn! 🗳️ ✓

🔍 Hel goobtaada: mnvotes.gov

🇲🇳 Horey ma u codeysay? Calaamadee saaxiib si aad u xasuusiso inay codeeyaan !#GetOutTheVote #LocalElectionsMatter

Maanta waa Maalinta Doorashada ee Minnesota! 🗳️ Doorashooyinka maxalliga ahi waxay qaabeeyaan bulshadeenna—laga bilaabo waxbarashada ilaa siyaasadda guud. Haddii aadan weli codeyn, wali waqti baa jira! 🔍 Hel goobtaada cod-bixinta: mnvotes.gov. Codkaagu waa muhiim—ka dhig mid la maqlo! ✓
#CivicEngagement #VoteMN

🔥 Xasuusin Maalinta Doorashada! 🔥 *Minnesota*, maanta waa maalinta aad codkaaga ku muujin karto!

🗳️ Doorashooyinka maxalliga ah waxay saameeyaan wax walba laga bilaabo dugsiyada ilaa amniga bulshada. Goobaha cod-bixintu waa furan yihiin ilaa **8:00 fiidnimo** — ha sugin!

✓ Hel goobtaada: mnvotes.gov/pollfinder

✓ Baro waxa ku jira warqadda cod-bixintaada: mnvotes.gov/myballot

🗳️ Cod kasta waa muhiim—calaamadee saaxiib si aad ugu xasuusiso inay iyaguna codeeyaan! ✓

#ElectionDay #LocalVotesCount

Maalinta Doorashada

Maalinta Doorashadu waa Noofembar 4, 2025, waxaana doorashooyin maxalli ah ka dhacayaan guud ahaan Minnesota sanadkan. Ka caawi bulshadaada / shaqaalahaaga / shabakadahaaga inay ogaadaan sida ay uga qaybqaadan karaan doorashada maxalliga ah ee ka dhaceysa deegaankooda **adigoo diraya fariimaha hoos ku qoran maalinta doorashada, Noofembar 4, 2025.**

Qalab iyo Fikrado Dheeraad ah oo Wacyigelin ah

Xaashiyo Xaqiiqooyin ah

[Xaashiyo Xaqiiqooyin](#) ah oo ku saabsan 13 mowduuc ayaa diyaar u ah in lagu isticmaalo bogagga internetka, baraha bulshada, email, iyo daabac ahaan. Waad soo dejisan kartaa, kana daabacan kartaa nuqullo si aad ugu adeegsato baahidaada. Xaashiyo badan oo kamid ah waxaa lagu heli karaa 11 luqadood.

Mowduucyada waxaa ka mid ah: Sida Loo Codeeyo; Cod-bixiyayaasha Cusub; Is-diiwaangelinta Maalinta Doorashada; Ka Codee Hore adigoo Maqan; Ogaaw Xuquuqdaada; Fasaxa Shaqada si Loo Codeeyo; Gargaar Cod-bixineed; Cod-bixiyayaasha Militariga iyo Dibadda; Ardayda Jaamacadaha; Ardayda Dugsiyada Sare; Cod-bixinta dadka haysta Diiwaanka Dambiyada; Doorashada Hordhaca ah; Shirarka Laamaha (Precinct Caucuses); Ardayda Dibadda Jooga; Maxaa Cusub 2023; iyo Doorashada Musharraxa Madaxweyne ee Hore.

Booqashada Xoghayaha Dowladda iyo Kulamada Shaqaalaha

Fadlan tixgeli in ka-qaybgalka cod-bixinta laga dhigo mowduuc looga hadlayo mid ama ka badan oo kamid ah munaasabadaha xaafadeed, is-imaatinnada bulshada, ama kulamada goobaha shaqada ee dayrtan. Shaqaalaha Xafiiska Xoghayaha Dowladda (OSS) waxay kaa caawin karaan dejinta barnaamij, waxaana suuragal ah in Xoghayaha Dowladda, Steve Simon, uu ka soo qayb galo munaasabadaha ka dhaca guud ahaan Minnesota.

Si aad jadwal ugu samayso booqasho lala yeesho Xoghayaha Dowladda, la xiriir: melanie.hazelip@state.mn.us, 612-327-1621 si aad jadwal ugu samayso booqasho lala yeesho Xoghayaha Dowladda, Steve Simon.

Tixgeli inaad martigeliso kulan xog-warran ah oo Voter 101 ah oo lala yeesho OSS

Kulamada Voter 101 waa hab wax ku ool ah oo lagu gaarsiiyo bulshadaada xog muhiim ah oo ku saabsan doorashooyinka. Inta badan waa kulan soconaya hal saac, waxaana ku jira waqti loogu talagalay su'aalo iyo jawaabo (Q&A). Mawduucu wuxuu noqon karaa wax kasta oo la xiriira cod-bixinta iyo doorashooyinka, iyadoo la eegayo waxa ugu habboon dhagaystayaashaada. Kulamadan waxaa soo jeedisa Melanie Hazelip, waxaana lagu qaban karaa si toos ah ama onleen ah. Si aad jadwal ugu samayso kulan Voter 101, la xiriir melanie.hazelip@state.mn.us, 612-327-1621.

Fiidiyowiyada

Share La wadaag fiidiyowyadan bogagga internetka, baraha bulshada, email-ka, isgaarsiinta gudaha, shaashadaha xarumaha, iyo munaasabadaha.

- **"It's Election Year, Minnesota!" "Waa Sanad Doorasho, Minnesota!"** (2 daqiiqo) — Fiidiyow firfircoon oo la sawiray, kuna socda si degdeg ah, kaas oo si kooban u sharaxaya habka cod-bixinta. Waxaa sidoo kale lagu heli karaa afafka [Hmong](#), [Somali](#) iyo [Spanish](#).
- **"Vote Early, Vote Absentee!" Ka Codee Hore, Ka Codee Maqan!"** (1 daqiiqo 30 ilbiriqsi) — Fiidiyow la sawiray oo faahfaahinaya habka cod-bixinta maqnaanshaha.
- **"Get Ready to Vote!" "U Diyaar Garow Cod-bixinta!"** (30 ilbiriqsi) — Fiidiyow la sawiray oo dulmar ka bixinaya aaladaha faa'iidada leh ee u diyaar ah cod-bixiyayaasha. Waxaa sidoo kale lagu heli karaa afafka [Hmong](#), [Somali](#) iyo [Spanish](#).

Fursado Gaar ah oo Hal-abuur Leh

- Ka fikir fursado cusub oo lagu horumarin karo ka-qaybgalka muwaadiniinta iyo cod-bixiyayaasha.
 - Ku dar [taariikhaha doorashada](#) shaashadda furitaanka kombiyuutarka
 - Ku dheji [xaashiyaha](#) xaqiiqooyinka boorarka farriimaha
 - Ku dheji [xaashiyaha](#) qolka nasashada
 - Ku dheji [xaashiyaha](#) qolka nasashada
 - Weydii bulshadaada inay la wadaagaan waaya-aragnimadoodii ugu horreysay ee cod-bixinta
 - Samee mini-website gaar ah oo u gaar ah wacyigelininta cod-bixinta

Booqo mnvotes.gov si aad u hesho agab iyo talooyin dheeraad ah.

Dhiirrigelinno Dheeraad ah oo Loogu Talo-galay Email, Baraha Bulshada, iyo Warsidaha Dijitaalka ah

Waxaa laga yaabaa in bulshadaa ama shirkaddaadu u baahan tahay in isgaarsiin gaar ah laga sameeyo mowduuc doorasho oo khaas ah. Waa kuwan mowduucyo dheeraad ah oo ku saabsan cod-bixinta oo aad tixgelin karto. Waxaad ka heli kartaa garaafyo buuxa oo diyaar u ah isticmaalka baraha bulshada ama email-ka halkan [here](#).

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mowduucyadan iyo kuwo kale waxaa laga heli karaa mnvotes.gov. Haddii aad u baahan tahay caawimo mowduuc gaar ah ama aad qabto su'aal la xiriirta cod-bixinta, la xiriir Melanie Hazelip: melanie.hazelip@state.mn.us, ☎ 612-327-1621

- Diiwaangelinta Cod-bixiyeyaasha : Haddii aad tahay qof cusub oo ku sugan Minnesota, aad dhawaan gudaha gobolka ugu guurtay, aadan cod-bixin in ka badan 4 sano, ama aad markii ugu horreysa u codeyneyso: Waa inaad is-diiwaangelisaa ka hor inta aadan codeyn. Waad is-diiwaangelin kartaa maalinta doorashada, balse si aad waqtiga u badbaadiso, waxaa fiican inaad diiwaangelinta dhameeyso ka hor Oktoobar 15, 2023.
 - [Diiwaangelin onleen ah](#)
 - [Soo daabaco foomka](#) oo boosto ku soo celin
 - Haddii aad qorsheyneyso in aad [is-diiwaangeliso maalinta doorashada](#), diyaarso aqoonsiga saxda ah!
 - Dhallinyarada 16 iyo 17 jir waxay [hore isu diiwaangelin karaan](#)
 - Waxaad [codeyn kartaa xitaa haddii aad leedahay diiwaan dambiyadeed](#), haddii aadan hadda xabsi ku jirin
- Shaqaalaha militariga iyo qoysaskooda ee ka maqan gobolka:
 - [Dalbo warqadda cod-bixinta maqnaanshaha](#) hadda
 - Dib ugu soo celi warqadda cod-bixinta [wakhtiyada la soo jeediy](#).
- Ma u Baahan Tahay Inaad Ka Codeyso Maqan? [Waa sidaan](#).
 - Haddii aad shaqo ku jirto ama safar ku maqan tahay gudaha dalka:
 - [Ka codee toos](#) ah inta aadan bixin.
 - [Dalbo warqad cod-bixin](#).
 - Shaqo/Safar Dibadda ah:
 - [Ka codee toos ah](#) ka hor intaadan safarka bixin.
 - [Dalbo cod-bixinta maqnaanshaha ee dibadda adigoo isticmaalaya foomka loogu talagalay](#).
- Cod-bixinta Maqnaanshaha ee Boostada – Sabab Looma Baahna
 - You Hadda looma baahna inaad bixiso sabab si aad u cod-bixiso adigoo isticmaalaya warqadda cod-bixinta maqnaanshaha.
 - Hadda looma baahna inaad bixiso sabab si aad u cod-bixiso adigoo [isticmaalaya warqadda cod-bixinta maqnaanshaha](#).
- Cod-bixinta Hore
 - Cod-bixiyeyaasha xaq u leh waxay bilaabi karaan inay dhiibtan codkooda **46 maalmood ka hor maalinta doorashada** iyagoo booqanaya [goobaha cod-bixinta](#) hore ee la cayimay.
 - Waxaad xaq u leedahay **fasax shaqo si aad u codeyso** wakhti kasta oo ka mid ah muddada cod-bixinta hore.
- Is-diiwaangelinta Goobta Cod-bixinta Maalinta Doorashada
 - If Haddii aad rabto inaad is-diiwaangeliso maalinta doorashada, waa inaad keentaa [aqoonsi sax ah iyo caddayn deganaansho](#). Waxaa jira ikhtiyaarro kala duwan oo la aqbal.
- Hel Goobtaada Cod-bixinta
 - Ma hubtaa meesha aad ka codeyneyso? [Hel goobtaada cod-bixinta](#) hadda!
- GOTV Ka-qaybgal Cod-bixinta
 - Cod-bixintu waa muhiim! Waa tiirka aasaasiga ah ee dimuqraadiyadeenna. Waa hab lagama maarmaan ah oo aad kaga qaybqaadan karto habka doorashada si codkaaga loo maqlo. Mararka

qaarkood, cod keliya ayaa go'aamiya natiijada doorasho—waxaa laga yaabaa in sannadkan uu noqdo codkaaga. ☒ Xaqiiji is-diiwaangelintaada ☒ Hel goobta aad ka codeyneyso ☒ Eeg warqaddaada cod-bixinta. Noqo cod-bixe!

- Amniga iyo Daahfurnaanta Doorashooyinka
 - Nidaamka doorashooyinka ee Minnesota waa mid si fudud loo heli karo, ammaan ah, oo la isku halleyn karo..
 - [Booqo website-keena cusub](#) si aad uga hesho xaqiiqooyin la xiriira doorashooyinka, iyo sida aan u ognahay in doorashooyinka Minnesota ay yihiin kuwo cadaalad ah, sax ah, oo sugan.

- Sanadkii 2016, markii dowlad shisheeye isku dayday inay jabsato nidaamka doorashooyinka ee Minnesota, weerarka si hore ayaa loo ogaaday loona joojiyay..
- Mas'uuliyiin ka tirsan hay'adaha sirdoonka iyo sharci-fulinta federaalka ayaa dhawaan si tijaabo ah u baaray amniga nidaamka doorashooyinka Minnesota iyagoo isku dayay inay jabiyaan—waxaan ka gudubnay tijaabadaas.
- Minnesota waxay si sharaf leh u ilaalisaa qaab-dhaqameedkeedii hore—waxaan isticmaalnaa warqado cod-bixin (paper ballots) si aad u hubiso in codkaaga la tiriyay, si sax ah loo tiriyay, loona kaydiyay haddii loo baahdo mustaqbalka.

Fikradaha Farriimaha Baraha Bulshada –

- **Sebteembar 19 – Warqadaha Cod-bixinta Maqan waa la heli karaa**
Badbaadi waqti maalinta doorashada adigoo ka codeynaya gurigaaga—[cod-bixi hore, boosto ahaan ama si toos ah](#). #mnvotes
Sebteembar 16 – Maalinta Qaran ee Diiwaangelinta Cod-bixiyeyaasha
Diiwaangelin kasta waa tallaabo hore loogu qaadayo dimuqraadiyad xooggan. [Isdiiwaangeli maanta](#). #mnvotes
- **Oktoobar 7 – Hal Todobaad ayaa Ka Hadhay Waqtiga Diiwaangelinta HoreDeadline**
Waxaad iska [diiwaangelin kartaa onleen](#) ilaa Oct. 15. #mnvotes. #mnvotes
- **Oktoobar 28 – Hal Todobaad ayaa Ka Haray Maalinta Doorashada**
Isdiyaari si aad codkaaga u dhiibato oo uga qaybqaadato si firfircoon qaabaynta mustaqbalkeena. [Booqo halkan](#) si aad u ogaato goobtaada cod-bixinta, saacadaha la furan yahay, iyo waxyaabaha lagaa rabo si aad isu diiwaangeliso Maalinta Doorashada. #mnvotes

Garaafyo

[Here Halkan](#)

Waxaad ka heli doontaa garaafyo buuxa oo diyaar u ah baraha bulshada ama iimaylka. Si xor ah ugu dar garaafyadan isgaarsiintaada—waa la isticmaali karaa si loo dhiirrigeliyo ka qaybgalka cod-bixinta.



Did you know?

In Minnesota, **you have the right to vote if you are in line before 8 p.m.**



Your vote, your voice.
16- and 17-year-olds can now preregister to vote.
[mnvotes.gov/register](#)

Did you know?

In Minnesota, **you have a right to take time off work to vote** without losing your pay, personal leave, or vacation time.



Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan la xiriir [Melanie Hazelip](mailto:melanie.hazelip@state.mn.us): 612-327-1621, melanie.hazelip@state.mn.us

